



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhawrka Guud**

WAR-SAXAAFADEED:

September 16, 2020

Shirka Caalamiga ee Hay'adaha Hantidhawrada Caalamiga (INTOSAI)

16.09.2020: Hantidhawraha Guud ee Qaranka, M/ne. **Maxamed Maxamuud Cali** ayaa ka qayb galaya shir caalami ah oo socon doona muddo labo maalmood ah taasi oo u dhaxaysa **16-17.09.2020**. Shirka ayaa waxaa soo agaasimay **URURKA HAY'ADAHA HANTIDHAWRADA CAALAMIGA** ee loo soo gaabiyo (**INTOSAI**). Sidoo kale, kulanka waxaa iyaguna ka qayb galaya Ururrada Hantidhawrayaasha Caalamiga **AFROSAI, AFROSAI-E** oo ay ku midaysan yihiin Hay'adaha Hantidhawrada Afrika ee Ingiriisiga ku hadla iyo kuwa *Carabta* ee loo soo gaabiyo **ARABOSAI** oo uu **Xafiiska Hantidhawrka Qaranku** xubin buuxda kawada yahay.

Shirkan oo u dhacaya qaabka muuqaal-aragga maadaama uu wali jiro saamaynta cudurka safmareenka ah **COVID-19** ee dunida oo idil saameeyay, ayaa inta uu socdo waxaa la isku dhaafsan doona xog iyo warbixinno la xiriira “*sidii loo hormarin lahaa kaalinta **Hantidhawrada ee kaga aaddan ilaalinta hantida dadwaynaha iyo hubantigalinta in loo maareeyo hantidaas si waafaqsan shuruucda u dagsan ee muhiimka u ah helitaanka ammaano iyo daah-furnaan kuwaas oo udub-dhexaad u ah hannaanka Dowlad wanaagga***”.

Hantidhawraha Guud ee Qaranka ayaa sidoo kale la filayaa inuu khudbad dhinacyo badan taabanaysa ka jeediyo madasha.

====DHAMMAAD====